

## La soo xiriir

### Dorotea

Byvägen 1, 917 81 Dorotea  
Telefoon: 0942-140 78  
E-mail: [biblioteket@dorotea.se](mailto:biblioteket@dorotea.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/dorotea](http://v8biblioteken.se/dorotea)

### Lycksele

Norra Torggatan 12, 921 31 Lycksele  
Telefoon: 0950-168 25, Fax: 0950-134 01  
E- mail: [biblioteket@lycksele.se](mailto:biblioteket@lycksele.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/lycksele](http://v8biblioteken.se/lycksele)

### Malå

Skolgatan 2A, 939 31 Malå  
Telefoon: 0953-141 20  
E- mail: [biblioteket@mala.se](mailto:biblioteket@mala.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/mala](http://v8biblioteken.se/mala)

### Norsjö

Skolgatan 26, 935 32 Norsjö  
Telefoon: 0918-142 55  
E- mail: [biblioteket@norsjo.se](mailto:biblioteket@norsjo.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/norsjo](http://v8biblioteken.se/norsjo)

### Sorsele

Storgatan 11, 924 32 Sorsele  
Telefoon: 0952-142 30, Fax: 0952-142 91  
E- mail: [bibliotek@sorsele.se](mailto:bibliotek@sorsele.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/sorsele](http://v8biblioteken.se/sorsele)

### Storuman

Stationsgatan 6, 923 31 Storuman  
Telefoon: 0951-141 80  
E- mail: [biblioteket@storuman.se](mailto:biblioteket@storuman.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/storuman](http://v8biblioteken.se/storuman)

### Vilhelmina

Tingsgatan 8, 912 33 Vilhelmina  
Telefoon: 0940-141 60  
E- mail: [folkbiblioteket@vilhelmina.se](mailto:folkbiblioteket@vilhelmina.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/vilhelmina](http://v8biblioteken.se/vilhelmina)

### Åsele

Lillgatan 2, 919 32 Åsele  
Telefoon: 0941-140 80  
E- mail: [biblioteket@asele.se](mailto:biblioteket@asele.se)  
Internetka: [v8biblioteken.se/asele](http://v8biblioteken.se/asele)

**Saacadaha aan furanahay waxaa ka heli  
[v8biblioteken.se](http://v8biblioteken.se)**

Somaliska




8 maktabad oo wada shaqeynta ka dhaxeeyso oo gobalka  
Västerbotten inland

# Ku soo dhawoow V8-biblioteken!

**Siddeed maktab – hal kaar**

Dorotea, Lycksele, Malå, Norsjö,  
Sorsele, Storuman, Vilhelmina  
iyo Åsele



*Anaga waxaan u wada shaqeyn sidaa adiga  
uga helikartid maktabka adeeg aad u fiican.*

**Deynso, dib soo celi iyo ka sii ballanso  
maktabka aad dooneysid  
– isla hal kaar isticmaal!**

## Kaarka deynsashada

Haddii aad dooneysid inaa wax deynsatid waxaa u baahantahay kaarka deynsashada. Kaarkas waxaa adiga ka heli maktabka oo waxaa tusi kaarka aqoonsiga oo leh sawir. Isla markasna adiga waxaa oggolaan inaa ku dhaqmeysid xeerarka deynsashada maktabyada V8-biblioteken.

Carruurta waxey helikaran kaarka deynta laga bilaabo sanadka ey buuxin 6 sano.

Kaarka deynsashada adiga waxaa u soo qaadan maktabka marka aad dooneysid inaa wax deynsatid. Kaarka deynsashada adiga waxaa u isticmaale dhammaan 8 maktab.

## Warbixinta qofka shaqsiga

Warbixinta oo deymaha iyo dalabyada qofka waxaa laga diwaangalin nidaam kombiyuutar ka wada dhaxeyso maktabyada V8-biblioteken.

Taasna micnaheeda tahay in shaqaalaha ey ka warhaayan warbixin saameyn ku yeelan sharciga furnaanshada iyo sharciga sir dhowrida (OSL).

Dhammaan shaqaalaha maktabka waxaa waajib ku ah sharciga warbixin dhowrida oo cutub 40 § 3.

## Deynta adiga baa mas'uul ka ah

Kaarka deynsashada waa hanti.

Taasna micnaheeda waa in adiga mas'uul ka tahay buugta iyo qalabka kale oo adiga kaarkaada lagu deynsado.

Waalidka baa mas'uul ka ah deymaha canuga. Sida ugu dhaqsaha badan ku soo ogeysii maktabkaada haddii kaarka deynsashada kaa lumo sidaa kaarkas u xiri karno. Haddii qofkale kaarkaada wax ku deynsado adiga baa mas'uul ka noqon karo bixinta magdhabka. Mid cusub waxaa ku heli 10 kr.

## Xilliga deynta

Xilliga deynta waa kala duwan yahay oo waxey ku xirantahay waxa aad deynsatay. Xilliga aad soo celineysid waxey ku qorantahay warqada caddeynta ama bogga aad ku leedahay v8biblioteken.se.

Adiga baa mas'uul ka ah in waxa aad deynsatay wakhtigii loogu talagalay ku soo celisid. Haddii wakhtigas la dhaafdo adiga waxaa bixin lacag ganaax oo la soo daahida. Qalabka iyo buugta carruurta iyo dhallinyarada oo lala soo daaho wax lacag ganaax ma la bixinaayo, iyo wixii canug iyo dhallinyaro deynsadan.

### Fadlan su'aal na weeydii!

Ma wax kale dooni inaad na weeydiisid?

**Na weeydii sidaa kuu caawino!**

## Dib u cusbooneysiin deyn

Haddii aad dooneysid inaa xilliga deynta sii dheereysatid soo gal v8biblioteken.se  
Adiga waxa soo wicikarta ama imaankarta maktabkaada iyo shaqaalaha ku dhihi karta i caawiya. Haddii adiga dib u cusbooneysiin deyn suubisid wakhtiga deynta kadib adiga waxaa bixin lacagta ganaaxa. Haddii xilligii deynta dhammatay ama qofkale saf ugu jiro qalabka dib ma u deynsankartid.

## Deynta lala soo daaho

Haddii qalabka aad deynsatay aadan soo celin labo xasuusin kadib, waxaa lagu soo diri warqada lacag bixinta iyo kaarka deynsashada waa la xiri. Kaarka waxaa lagu furi markaa deynta soo celisid ama lacagta soo bixisid.

Warqada lacag bixinta oo canuga iyo dhallinyarada ka yar 18 sano waxaa loo diri waalidka mas'uulka.

## Sii ballansashada

Adiga waxaa sii ballansankarta buug la deynsaday ama 8 maktab midkood yaal. Adiga waxaa lagu soo diri farriin marka aad buuga soo doonankartid.

Ka sii ballanso maktabkaada ama v8biblioteken.se

## Kharashka

In la deynsado waa bilaash! Laakin maktabka kharash buu ka qaadi qofkii deynta la soo daaho.

Xilliga deynta 28 maalmood 1 kr/maalintiiba

Xilliga deynta 14 maalmood 5 kr/maalintiiba

Adiga waxaa bilaabi inaa bixisid kharashka la soo daahida laga bilaabo maalinta aad 18 sano gaartid. Kharash la soo daahid ma laga qaado buugta carruurta iyo dhallinyarada.

Maktabka kharash buu bixi ku dhihi haddii aad wax aad deynsatay lumisid ama soo dhaawacdid. Labadaas xaaladba maktabka qiimeynta iyo kharashka ey bixi ku dahaan baa kan saxda eh iyo weey kala duwanaankaran.

## Lambarka sirta

Lamarbka sirta wuxuu ku xiranyahay kaarkaada deynsashada. Adigoo kaarkaada isticmaaleysid baa soo galikarta bogga aad ku leedahay maktabka. Meeshas adiga deymahaada baa dib u cusbooneysiinkarta, qalab sii ballansankarta, digitaal ahaan u deynsankarta iyo ka raadinkarta kombiyuutarkeena. Adigoo isticmaali Lamarka sirta[PIN-kod] baa isticmaalikarta maskiinka adiga gacantaada ku deynso oo ka heleysid maktabka.